

بسم الله الرحمن الرحيم

السلام عليكم ورحمة الله وبركاته

Nafyahay Ilaahay u Soo Noqo

Qof Towbad Raadisa

==========

Xalay anigoo xilli ay waqti dambe tahay wax akhrisanaya ayaa waxaan ka fakiray xaalada qofka naftiisa ku gafay, kana

dheeraaday dariiqa khayrka, shaydaankuna ku arooriyay wadiiqooyinka dambiga iyo macsida, kuna silsiladeeyay dabarada balwada iyo raaxada xaaraanta ah, iminkana raba inuu towbad keeno, isbedelo, una soo noqdo Rabigii caza wajalla ka hor intayna geeridu ku qaban oo daf siin miciyaheeda aan lahayn ka fakashada.

Qoraalku si xarfiya ulama jaan qaadayo qiso gaara ama sheeko khaasa, in kastoo uu ku dul wareegayo, kana hadlayo dhacdooyin isku eeg oo ku soo noq noqda nafta,qalbiga iyo caqliga bani aadanka.

Qoraaguna wuxuu soo xaadirsanayaa, soona xero gelinayaa dareen caadifiya oo ka faaloonaya kacdoonka iimaaniga ah ee hiyi kiciya qofka

doonaya inuu ka digo rogto ama ka ruqaansado nolosha macsida, iska hurgufo boodhka iyo habaaska xumaanta, iskana dhiciyo shaydaanka iyo hawada. Waxa kale oo uu dhuuxayaa sheeko hoosaadka uu qofka sidani iskugu waramo intuu ku dhex jiro marxalada is-canaanashada iyo dhiirigelinta nafta, si uu ooda u jabiyo, ugana dhex baxo xaalad macsiyeedka uu u garbo duuban yahay.

Caqliga waxa la xawaareeyay ka fakirka xaaladaha uu qofka sidani marayo , muuqaalada dhacdooyinka kacdoonkiisa ruuxaaniga ah iyo awooda mujaahadada uu ku howl galayo, qalikuna wuu taraaray isagoo ku talaabsanaya inuu maalo fikirka godladay una diidu inuu gaagaxo, khadkana wuxuu ku xariiqay sadaro tarjumaya,

muujinaya oo daaha ka faydaya mujaahadada iyo halganka iimaaniga ah ee ku dhisan geesinimada iyo go’aanka adag een lahayn dibu-gurashada ee lagu yaqaano qof walba oo u hanqal taagaya isbedel iimaaniya iyo doonis ku mashquulsan badbaadada naftiisa iyo liibaantiisa aakhiro.

****

****

****

Bal hadaba ila akhriya,

Naftiisa ayuu la hadlayaa oo mar wuu waaninayaa marna wuu canaananayaa, mar wuu karbaashayaa marna wuu u naxayaa, mar wuu u hanjabayaa marna wuu dhiirigelinayaa, mar wuu u cabanayaa marna wuu ka ashtakoonayaa, mar sidii caruurtuu sasabayaa marna sidii

waayeelkuu wax ula gorfaynayaa, mar wuu qasbayaa marna wuu u caqli celinayaa, mar wuu la murmayaa marna wuu la garnaqsanayaa.

Waa wada xaajood dhex maraya isaga iyo naftiisa, waa dacwad, waa xisaabtan iyo waano ku wajahan naftiisa uu ku howlan yahay liibaanteeda iyaduna ay halacsanayso iskana daba ridayso waxay ku halaagsamayso.

Naftaydaay hawo raac muxuu ku baday, naftaydaay shaydaan muxuu jar kaaga talaabsaday, naftaydaay imisaad amar Ilaahay jabisay, naftaydaay imisaad xaaraan dhex dabaalatay, naftaydaay imisaad ardaa macsiyeed ku saamo layltay? Naftaydaay imisaad maaweelo iyo madadaalo fisqiya

ku daashay? Naftaydaay imisaad kala-doorashada fuxshiga sida turubka u baandhaysay?

Wuu isla hadlayaa, wuu duryamayaa, wuu hadrayaa oo wax buu gocanayaa, wixii u galay, wixii uu galabsaday iyo wixii uu kasbaday ayaa maskaxdiisa ugu soo qulqulaya sidii daad rogmanaya. Hadduu indhaha isku qabto, hadduu kali iskula baxo iyo hadduu fakiraba waxa madaxiisa sidii roob dhagaxyaale ah u garaacaya oo u xanuujinaya xusuusta dambiyadii uu galay iyo raaxadii xaaraanta ee uu dhex muquuran jiray!!!

Haddana dib ayuu iskugu noqonayaa oo wuxuu leeyahay: waar calaacal aan wax qabad lahayn iyo canaan aan isbedl

lahayni midna wax kuuma keeno, wax kaa tageyna tiigsimaad ma leh, Markaasi ayuu bilaabayaa hadal wax qabad iyo isbedel horseedaya, isagoo raba inuu iska rogo heeryada quusta ee uu hilaaban yahay ayuu mar kale la hadlayaa naftiisa.

Wuxuu tusayaa naxariista llaahay caza wajalla, haddana wuxuu u sheegayaa cadaabkiisa iyo ciqaabtiisa. Wuxuu milicsiinayaa naciimka janada, haddana wuxuu ku cabsiinayaa holoca naarta.
Waa qof ay dunuubtu cuslaysay, waa qof ay macsidu geed ku xidhatay, waa qof la rafaadsan naftiisa, waa qof bohol ugu dhacay shahwadiisa iyo hawadiisa, waa qof ku asqaysan geri go'anta balwada iyo raaxada xaaraanta ah.

Isla markaa waa qof la dawakhsan siduu uga fakan lahaa sharka uu ku dhex jiro, waa qof doonaya inuu iska jaro dabarada xumaanta, waa qof raadinaya jidka towbada iyo toosnaanta, waa qof la daalaa dhacaya murug iyo walaac, waa qof ay dhargin wayday balwadu, waana qof khaatiyaan ka jooga damaca naftiisa.

Intaa waxa u dheer inuu rajo weyn ka qabo raxmada iyo naxariista Rabigii caza wajalla, wuxuu rumaysan yahay inuu Ilaahay ka toobad aqbali doono hadduu ka soo noqdo dariiqa dambiga iyo macsida, wuxuu og yahay in naxariista Ilaahay caza wajalla balaadhantahay, Rabigiina ku farxo towbada adoonkiisa.

Naftiisuu ku abaabulayaa inay soo noqoto oo ay dhakhso u raacdo jidka towbada, isagoo u dhawaaqaya oo u naadinaya ayuu ku leeyahay: Rabigay u soo noqo oo degdeg u soo noqo, Rabigay waa Raxiim, Rabigay waa Qafuur, Rabigay waa Cafuw, Rabigay waa Waduud, Rabigay waa Ladiif, Rabigay waa Samiic, Rabigay waa Qariib, ee soo noqo oo dhakhso u soo noqo nafyahay.

Codkiisa ayaa laga dhex maqlayaa muragada qalbigiisa, tiiraanyada damiirkiisa iyo cabsida uu la walaacsan yahay, laakiin naftiisa wuxuu ku wadaa dhiirigelin isdaba jooga iyo boorin laxaad leh, wuxuu ku mashquulsan yahay siday naftiisu isku bedli lahayd, ugana dhex bixi lahayd nolosha macsida, dambiga, balwada iyo

baashaalka xaaraanta ah.

Wuu og yahay in isbedelka uu naftiisa la rabaa u baahan yahay geesinimo iyo go'aan adag oon ka-soo-noqosho lahayn, wuu og yahay in looga baahan yahay inuu balwadihiisii iyo dhaqanadiisii xumaa ku gowraco bilaawaha istiqfaarta iyo istiqaamada, wuuna og yahay inay saaxibadii baashaalka macsida ay kala dhaqaaqeen.
Intaaba wuu og yahay, laakiin wuxuu go'aansaday inuu ku hayaamo jidka cibaadada iyo camalka suuban, wuxuu niyaystay oo waliba si adag u niyaystay inuu inta noloshiisa ka hadhay masjid galeen noqdo, dhinacna ka raaco geediga saalixiinta.

Wuxuu doonayaa inuu iska

daadiyo dunuubta cuslaysay, inuu xoojiyo cilaaqada uu la leeyahay Rabigii caza wajalla, gurmad buu doonayaa, badbaaduu doonayaa, istiqfaar buu doonayaa, towbad buu doonayaa, nolol xalaala buu doonayaa.

Wuxuu naftiisa ku leeyahay:

Naafyahay nin walba oo sariir ku dakeeyaba soo deg baa ka dambaysa.
Nafyahay nin walba oo la fooladeeyaba qabri baa sugaaya.
Nafyahay soo noqo oo soo noqo, nafyahay la soo noqo qalbi khushuucsan iyo indho ilmada qubaya, nafyahay u soo noqo Rabigay.

Nafyahay aduunyadu waa maalmee igu caawi sabir iyo adkaysi.

Nafyahay aduun lagu waari maayee ila raadi aakhiro iyo meel roon,
Nafyahay go'aan adag yeelo oo toobad keen intay goori goor tahay.
Isagoo u sheegaya murugada qalbigiisa iyo siduu uga xun yahay inuu ku arooriyay wadada macsida, ayuu hadana uga digayaa naftiisa xisaabta aakhiro iyo shidada maalinta qiyaamaha.
Naftiisa ayuu u sheegyaa inuu male wanaagsan ka qabo Rabigii caza wajalla, wuxuu tusayaa fadligiisa, raxmadiisa waasica ah iyo cafwigiisa.

Xaaldan oo kale waa inuu qofka Ilaahay u soo noqonayaa telefoonkiisa ka masaxo numbarada saaxiibadii macsida, facebuugiisa ka tirtiro sawarida hablaha uu ku soo tooso kuna

seexdo aragooda, gaadhiga uu ribada ku iibsaday waa inuu shidhka ugu dhaco una celiyo shirkada, saraawiisha sinta uu ka xidho iyo garamada(T shirts) xundhurta ku siman waa inuu ku bedelo dhar cawradiisa astura, salaaduna ugu ansaxdo.

Talaabada ugu adag ee uu qaadayo qofka towbad raadiski waxay noqon kartaa hadduu ku dhex jiro haasaawe iyo baashaal xaaraana siduu isbedelkiisa ugu sheegii lahaa inantii uu kash iyo laaba ka jeclaa, ku indho kuulan jray arageeda, ku riyoon jiray la kulankeeda, kuna farxi jiray lana mabsuudi jiray maqalka hadalkeeda, inanta xumaantan oo kale dhex dabaalanaysa iyaduna wa sidan oo kale.

Waa inuu garto in cilaaqada xaaraanti naftiisa iyo teedaba

heerayso, diintooda dhaawacayso, kuna wada ridayso shoolada fisqiga iyo fuxshiga ee holcaysa, waa inay u muuqataa in raaxada macsidu ay naftiisa ku shidayso dabka murugada, cabsida iyo xasilooni la'aanta uu la gubanayo.

Rag badan ayaa iska xejin kara noocyo kala duwan oo ka mida macsida, oo tusaale ahaan haddii koob khamriya la soo hor dhigo aan lagu dagi karayn oo diidaya, ama aan lagu iibsan karayn shilin iyo doolar xaaraana, ama beenta iyo khiyaanada iska ilaaliya, haddiise lagu fitneeyo inan qurux badan oo u heelan lana dhacsan macsida iyo dambiga aan ka adkaysan karin xumaanta, oo markiiba gacanta qabsanaya.

Xalaawada iimaanka iyo macaanka cibaadada ayaa u diidi doona inuu dib u jaleecu noloshii jaahiliga ee loo baahan yahay inuu ka hilaabto horena uga socdo, milicsiga nicmada iyo barwaaqada janada ayaa u noqan doona tamar rooxaaniya oo uu ku ilaawo cilaaqada ku dhisan dambiga iyo macsida, kana faraxasho xaaraanta, fisqiga iyo fuxshiga uu huwinayo ee labis qurux badan uga dhigayo jacayl iyo caashaq, oo runtii ah dareen shahwaaniya oo shaydaanku ku afuufayo naftiisa xumaanta faraysa, sidaa awgeed waa inay kala khaatumaystaan, ugana tago Ilaahay dartii.

Gabogabo iyo gunaanad khayr leh:

Isagoo nadiifa oo nuurka

weysadu ka soo ifayo wajigiisa ayuu u talaabsanayaa dhinaca masaajidka, wuxuuna halkaa ka bilaabayaa nolol ku camiran salaad, soon, tasbiix, tahliil, takbiir iyo wixii Rabigii caza wajala raali gelinaya.

Ugu dambayna, isagoo khushuucsan oo ay ilmo farxad iyo rajo ku dheehani ka qubanayso idhihiisa ayuu Ilaahay ka baryayaa inuu ducadiisa ka aqbalo , inuu u dambi dhaafo, kuna sugo diinta iyo camalka suuban, ugana hiiliyo shaydaanka iyo wax walba oo ka leexinaya jidka toosan iyo nolosha cusub ee uu qaatay, wuxuu Ilaahay caza wajalla weydiisanayaa khaatumo wanaagsan, iyo inuu ugu deeqo raalidiisa, hoygiisa aakhirana ka yeelo durdurada naciima iyo janatu Firdowsa.

Alow uga yeel..Alow uga yeel..Alow uga yeel adaa Qaadiree..Alow Aqbal ducadiisa...aamiin...aamiin...aamiin.

Dr.Maxamed Sh.Cabdiraxmaan Kaariye

prepared pdf KobciAqoontaada special Abu dujaana